



## **Su'aalaha Inta Badan La Isweydiyo – Gargaarada Dowladdeed Cusboonaysiintii u Dambaysay Lagu Sameeyay Oktoobar 21, 2019-ka**

**Macluumaadkan midkoodna kama dhigna talo dhanka sharciga ah. Kani waa macluumaad hordhac ah waxaana laga yaabaa in la cusbooneysiyo marka la helo macluumaad dheeraad ah.**

**Taariikhda:** Ogoosto 12, 2019, Wasaarada Amniga Gudaha ee Maraykanku waxay ku dhawaaqday in la dhammeystiray xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge' oo cusub. Xeerka cusub wuxuu dhaqan geli doonaa Oktoobar 15, 2019-ka, mana aha mid muddo hore la oggolaaday. Isbeddelada waxaa ka mid ah, balse aanay ku koobnayn ballaarinta noocyada gargaarada dadweynaha ee tixgelinta lagu siinayo daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed 'public charge'. Sida uu dhigayo xeerka hadda jira, gargaarada dadweynaha kaliya ee hadda tixgelinta la siinayo marka la go'aaminayo qofka ay u badan tahay in uu noqdo qof helaya gargaarada dowladdeed "public charge" waa barnaamijyada taageerada lacageed iyo daryeelka muddada fog ee ay Medicaid dhaqaalihiiisa bixiso.

Xeerka cusub wuxuu ballaarinayaa/kordhinayaa liiska faa'iidooyinka si loogu daro (Barnaamijka Gargaarada Nafaqada Dheeraadka ah); taageerada guryaha, guryaha dadweynaha iyo Section 8); iyo Medicaid aan degdega ahayn ee loogu talagalay dadka waaweyn ee aan uurka lahayn ee da'doodu tahay 21 iyo ka weyn.

Xeerarka u qalmida ee loogu talagalay barnaamijyada faa'iidooyinka dadweynaha ee Oregon *lama* beddelin iyada oo muhaajiriinta badan laga dhaafay xeerka gargaarada dowladdeed (xeerka hadda jira iyo midka cusub). Waxaan ogsoonahay in isbeddelkan dhanka federaalka ahi walaac iyo jahwareer u keeni karo dadka reer Oregon ee isticmaala gargaarada dadweynaha ee uu saameeyay. Waxaan rajeynaynaa in macluumaadkani kala caddeeyo cidda ay saameynta ku yeelanayaan gargaarada dowladdeed 'public charge' iyo sida loo helo caawimaad haddii loo baahdo.

### **Waa maxay gargaarada dowladdeed?**

Gargaarada dowladdeed "public charge" ama daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed "public charge test" waxaa isticmaala mas'uuliyiinta laanta socdaalka si loo go'aamiyo in qof soo geli karo Maraykanka ama heli karo Sharciga Deganaanshaha Rasmiga ah (LPR) sida (kaarka deganaanshaha "green card").

### **Sidee baa go'aanada gargaarada dowladdeed "public charge" loo gaaray?**

Sida uu dhigayo xeerka hadda jira, mas'uuliyiinta laanta socdaalka ayaa fiiriya dhammaan duruufaha qofka si loo go'aamiyo haddii uu qofku u badan yahay in uu mustaqbalka ku tiirsanaado taageerada lacageed ama daryeelka muddada fog ee *dowladda*.

Laga bilaabo 15, 2019, sida uu dhigayo xeerka hadda jira, mas'uuliyiinta laanta socdaalka waxay sidoo kale eegi doonaa isticmaalka mid ama ka badan oo ah faa'iidooyinka soo socda:

- Barnaamijka Gargaarada Nafaqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP).
- Guryaha dadweynaha ama taageerada guryaha ee Section 8.
- Medicaid aan degdega ahayn ee loogu talagalay dadka waaweyn ee aan uurka lahayn ee da'doodu tahay 21 iyo ka weyn (marka laga reebo hooyooyinka cusub taasi oo loogu talagalay 60 maalmood ka dib dhalashada ilmaha).

Mas'uuliyiinta laanta socdaalka waxay tixgelin siiyaan da'da qofka, caafimaadka, xaaladda qoys iyo dhaqaale, waxbarasho, iyo xirfad. Haddii mas'uuliyiinta laanta socdaalku go'aamiyaan in qofka ay u badan tahay in uu noqdo qof *mustaqbalka* helaya gargaarada dowladdeed "public charge", mas'uulku wuxuu diidi karaa bixinta/siinta arjiga codsi ee qofku ku soo gelayo Maraykanka ama kaarka deganaanshaha "green card".

### **Qofkee ayay saameyn ku yeelanayaan gargaarada dowladdeed?**

Gargaarada dowladdeed waxaa *kaliya* loo tixgeliyaa kuwa dalbanaya in ay:

- Soo galaan Maraykanka.
- Kordhistaan fiisahooda (tusaale, kuwa isla haddaba Maraykanka jooga).
- Hagaajiyaan xaaladooda deganaansho si ay noqdaan kuwo leh Sharciga Deganaanshaha Rasmiga ah (sida, inay haystaan kaarka deganaanshaha haysta "green card").
- Qofka kaarka deganaanshaha haysta "green card" ee ka tega Maraykanka wax ka badan 180 maalmood oo xiriir ah ka dibna dib u soo gela.

### **Qofkee ayaanay saameyn ku yeelanayn gargaarada dowladdeed?**

- Muwaadiniinta Maraykanka — kuwa ku dhashay dalka Maraykanka iyo kuwa muwaadiniinta noqday labadoodaba.
- Muhaajiriinta haysta sharciga deganaanshaha rasmiga ah sida kaararka deganaanshaha "green cards" oo ay ku jiraan kuwa dalbanaya muwaadinimada Maraykanka.
- Muhaajiriinta Maraykanka u jooga sababa bani'aadaminimo. Tusaale, muhaajiriinta ay xaaladooda tahay sida soo socota waxaa laga reebay in la eego gargaarada dowladdeed "public charge"
  - Qoxootiga.
  - Magan gelyo doonka (ay ka mid yihiin dadka uu u socdo nidaamka dalbashadu/codsigu).
  - Xaaladda si ku meel gaar ah loo ilaaliyo.
  - Xeerka Rabshada Ka dhanka ah Haweenka ee dadka iskood si gaar ah codsi u gudbinaya, oo leh iska dhaafida qaarkood.

- Kuwa haysta fiisooyinka T ama U, guud ahaan.
- Dhalinyarada muhaajirka ah ee gaarka ah.
- Dadka qaarkood ee meel ay ku xirnaayeen laga sii daayay, iyo dhowr nooc oo kale oo ah dadka aan muwaadiniinta ahayn.
- Xubnaha shaqada ciidan haya iyo qoysaskooda.

**Maxay yihiin barnaamijyada faa'iidooyinka dadweynaha ee uu saameynta ku yeelanayo sharciga hadda ee gargaarada dowladdeed?**

- Barnaamijyada taageerada lacageed ee federaalka, gobolka ama degaanka oo ay ku jiraan Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI) iyo Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF).
- Daryeelka muddada fog ee ay Medicaid dhaqaalihiiisa bixiso.

**Maxay yihiin barnaamijyada faa'iidooyinka dadweynaha ee laga bixiyo Oregon ee ay u badnaan doonto in uu saameyn ku yeesho xeerka gargaarada dowladdeed 'public charge' oo cusub?**

- Medicaid aan degdega ahayn ee loogu talagalay dadka waaweyn ee aan uurka lahayn ee da'doodu tahay 21 iyo ka weyn.
- Barnaamijka Gargaarada Nafaqada Dheeraadka ah (Supplemental Nutrition Assistance Program - SNAP).
- Barnaamijyada taageerada lacageed ee federaalka, gobolka ama degaanka oo ay ku jiraan Sugidda Dakhliga ee Kabista ah (SSI) iyo Taageerada Ku meel gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF).
- Taageerada Dhanka Ijaarka ee Guryaha Section 8 (foojarada kala doorashada guryaha).
- Guryaha mashruuca ah ee Section 8 ku saleysan iyo guryaha la kabo.

**Miyaa xaaladda degdega ah ee Medicaid (tusaale, Caafimaadka Degdegga ah ee Muwaadinka Ajnabiga Laga Saamaxay ama CAWEM lagu daray xeerka cusub? Maya.**

**Maxay yihiin barnaamijyada faa'iidooyinka dadweynaha ee laga bixiyo Oregon ee aanu saameynta ku yeelan xeerka cusub?**

- Barnaamijka Cover All Kids ee Oregon.
- Adeegyada badankooda waxaa bixiya barnaamijka Caafimaadka Taranka ee Oregon.
- Barnaamijyada Medicaid waxaa heli kara kuwa ay da'doodu ka yar tahay 21 ama uurka leh (oo ay ku jiraan 60 maalmood ka dib dhalashada ilmaha).
- Adeegyada waxbarashada gaarka ee ay daboosho Medicaid ee dhaqaalihiiisa lagu bixiyo Xeerka Waxbarashada Dadka Naafada ah (IDEA).
- Barnaamijka Caymiska Caafimaadka ee Carruurta (CHIP).
- Barnaamijka nafaqada dheeraadka ah ee Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta (WIC).
- Kabista lacagta caymiska caafimaadka ee ganacsiga ah oo la bixiyo iyada oo la adeegsanayo Meesha Hawsha Caymiska Caafimaad u Qaabilsan ee Oregon.
- Adeegyada caafimaadka dugsiga ku-salaysan.

- Barnaamijka Qadada Dugsiga ee Lacag la'aan ah ama Qiimaheeda hoos loo dhigay (fadlan ogow in isku gudbinta barnaamijkan oo la sii marayo SNAP tixgelinta la siin doono sida uu dhigayo sharciga cusub).
- Barnaamijyada Xeerka Qofka Waayeeelka ah ee Maraykanka ah.
- Barnaamijyada gobolku dhaqaalihiiisa bixiyo ee lagu caawiyo dadka waaweyn iyo dadka naafada ah, sida barnaamijka Mashaariicda Madaxa bannaan ee Oregon.
- Kabitaanka Dakhliga Hooseeya (LIS) ee Medicare Part D.

### **Maxay tahay in dadku ka ogaadaan gargaarada dowladdeed 'public charge'?**

- Muhaajiriin badan ayaanu saameyn ku yeelanayn gargaarada dowladdeed 'public charge'.
  - Kuwo badan ayaa laga dhaafay, sida qoxootiga iyo magan gelyo doonka.
  - Gargaarada ay isticmaalaan xubnaha qoyska ka tirsan lama xisaabin doono, marka laga reebo iyaga oo dalbanaya kaarka deganaanshaha "green card".
- Xeerarka u qalmida ee loogu talagalay barnaamijyada faa'iidooyinka dadweynaha sida Qorshaha Caafimaadka Oregon lama beddelin.
- Xeerka cusub ma dhaqan gelayo ilaa laga gaarayo Oktoobar 15, 2019, mana aha mid muddo hore la oggolaaday.
  - Wuxuu kaliya khuseysaa codsiyadu la gudbiyo muddo ku beegan ama ka dambeysa Oktoobar 15, 2019.
  - Isqorida la isqoray mid ka mid ah barnaamijyada faa'iidooyinka dadweynaha ee xeerka cusubi saameynta ku yeeshay ka hor Oktoobar 15, 2019, looma tixgelin doono daraasadda lagu sameynayo gargaarada dowladdeed 'public charge test'.
- Marka ay noqoto gargaarada dowladdeed waxay eegtaa dhammaan xaaladaha qofka — kaliya ma aha in ay isticmaaleen ama u badan in ay isticmaalaan gargaarada dadweynaha — iyada oo arimo dhowr ah oo wanaagsan oo loo eegayo kuwo xun ee jira.
- Gargaarada dowladdeed waa mid adag. Kiis kastaa wuu kala duwan tahay. Waa muhiim in la helo xaqiiqooyin ka hor inta aan isbeddel lagu sameyn qoyskaaga.
- Caawimaad ayaa la helayaa. Kala xirii qareenka dhanka socdaalka su'aalaha ku saabsan kiiskaaga iyo in aad ogaato haddii ay gargaarada dowladdeed 'public charge' khuseeyaan adiga ama qoyskaaga.
  - Qareen dhanka socdaalka ah ka hel <https://oregonimmigrationresource.org/resources/>.
  - La xiriiir Khadka Xarunta Sharciga Oregon iyo Adeegyada Gargaarka Sharciga ee Oregon [800-520-5292](tel:800-520-5292) wixii su'aalo ah ee ku saabsan gargaarada dadweynaha.
- Macluumaadkaaga shakhsi ahaaneed waa mid la dhowray.
  - Sharciyada federaalka iyo gobolka ayaa ilaalinaya asturnaanta dadka dalbada/codsada isla markaana hela gargaarada dadweynaha.
  - Gobolka Oregon looma oggola in uu dadka la wadaago macluumaadka shakhsi ahaaneed ee qofka ee loogu talagalay ujeedooyin dhanka socdaalka ah, ee leh iska reebitaan kooban (sida ammar maxkamadeed oo uu saxiixay qareen).

**Su'aalaha? Fadlan la xiriir barnaamijyada soo socda:**

**Guryaha Oregon iyo Adeegyada Bulshada**

- Ariel Nelson, Isku xiraha Xiriirada iyo Isgaarsiinta Dowladda [Ariel.Nelson@oregon.gov](mailto:Ariel.Nelson@oregon.gov)

**Waaxda Adeegyada Dadweynaha**

- Cynthia Stinson, Kooxda Xiriirada Sharci dejinta, [Cynthia.J.Stinson@dhsosha.state.or.us](mailto:Cynthia.J.Stinson@dhsosha.state.or.us).

**Waaxda Maamulka Caafimaadka**

- Jeannette Taylor, Xiriirada Dowladdeed, [Jeannette.T.Taylor@state.or.us](mailto:Jeannette.T.Taylor@state.or.us)

**Meesha Hawsha Caymiska Caafimaad u Qaabilsan ee Oregon**

- Chiqui Flowers, Maamulaha, [Chiqui.I.Flowers@oregon.gov](mailto:Chiqui.I.Flowers@oregon.gov)

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Kala xiriir Contact Oregon Health Authority 503-945-6691 ama email u dir [OHA.ExternalRelations@state.or.us](mailto:OHA.ExternalRelations@state.or.us). Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.